



St. Louis Park Public Schools

Achieving success, one student at a time!

Taariikhda: Janaayo 11, 2017

Ku: Waalidka: _____

Ka: Dugsiyada Sare ee Dowlada ee St. Louis Park iyo Waaxda Cudurrada Faafa ee Degmada Hennepin (St. Louis Park Public Schools and Hennepin County Public Health)

Ujeedo: **Iska Baarida Cudurka Qaaxada**

Ruux jooga Dugsida Sare ee Dowlada ee St. Louis Park (St. Louis Park High School) ayaa waxaa laga helay cudurka qaaxada (TB). Maamulka Dugsiyada Sare ee Dowlada ee St. Louis Park iyo Waaxda Cudurrada Faafa ee Degmada Hennepin ayaa waxa ay si wada jir ah uga wada shaqeynayaan in ay sugaan sidii looga ilaalin lahaa ardayda iyo shaaqaalaha cudurka qaaxada ah ee qofka laga helay in ay qaadaan (TB).

Ruuxii laga helay cudurka hadda waxaa u socota daaweyn laga daaweynayo cudurka wax kale oo khatar ah ama is qaadsiin cudurka ah oo hada cid kale looga baqsan yahayna ma jiraan.

Cudurka TB da waxaa qaadi kara qofkii qof cudurka (TB) qaba ay muddo dheer meel wada joogaan. Waxaa la sugay in laga yaabo in ilmahaagu uu qof qaaxo qaba uu muddo badan ka ag dhowaa sidaa awgeed waxa aanu jeclaan lahayn in aan u fidino ilmahaaga ka baarid cudurka oo **BILAASH AH** qarsoodina ah oo aan cidii ogoyn.

Baaridani waxa ay ka kooban tahay ka eegida astaamaha cudurka laga eegayo ilmaha iyo ka baaritaanka maqaarka cudurka qaaxada. Xataa hadii ilmahaaga horey maqaarkiiisa ama dhiigiisa looga helay TB waxaan doonaynaa in aan marka walba baaritaanka qaaxada marino.

Baaritaanka waxaa ilmaha uga qaadi doona Dugsida Sare ee St. Louis Park (St. Louis Park High School), maalmahan iyo waqtiyadan soo socda shaqaalaha Waaxda Cudurrada Faafa ee Degmada Hennepin (Hennepin County Public Health):

(Wareysiga iyo goobta lagu qaadayo baarida qaaxada maqaarka): Janaayo 30, Janaayo 31, 2017
(Eegida in meesha la muday ee maqaarka soo kuusantay): Febraayo 2, Febraayo 3, 2017

*Waa lagama maarmaan in ilmahaagu uu xaadir yahay xiliga meeleynta iyo eegida labadaba

Fadlan sida ugu dhaqsaha badan u akhri una saxiix warqada ogolaanshaha ah ee halkan ku jirta. Ilmahaaguna u soo dhiib si uu ugu soo celiyo warqada ogolaanshaha xafiska ardayda Jimcaha ay bisha Janaayo tahay 19, 2017. *Hadii warqadaa ogolaanshaha ah aan la soo celin ilmahaaga iskuulka cudurka loogama baari karo.

Hadii aan ilmahaaga cudurka looga baarin iskuulka waxaa kula soo xiriiri doona Waaxda Caafimaadka Guud ee Degmada Hennepin si ay u qabtaan balanta ilmahaaga looga baarayo TB da. Baarida waxaa looga qaadi karaa ilmaha Rug Waaxda Caafimaadka Guud ama waxaa looga qaadi karaa xafiiska dhaqtarka ilmaha, hase yeeshee waa muhiim in marka hore lala hadlo Waaxda Cudurrada Faafa si loo sugo in ilmahaagu helo baarid iyo daba galid quman oo hagaagsan.

Warqada halkan lagu soo riday ee xaqaa'iqda cudurkan ka hadlaysaa waxa ay adiga ku siinaysaa akhbaar muhiim ah oo ku saabsan cudurka TB da. Hadii aad wax walaac ahi kugu jiro oo aad jeclaan lahayd in aad cid kala hadasho walaacaa, fadlan la soo xiriir Trent Daugherty, oo ka tirsan Waaxda Cudurrada Faafa ee Degmada Hennepin khadkiisa waa 612-382-8666.

Waan mahadsan tahay,
Rob Metz
Aaryowga La siiyey